

# KAAR SOCDAAL OO CUSUB - FURSADO CUSUB OO SOCDAAL

**1 October 2016**, Sörmlandstrafiken waxay bilaabaysaa nidaam cusub oo tiket iyo lacag bixin. Nidaamka macnihiisu waa dhowr sare u qaadis oo casri ah ee loogu talo galay rakaabkeena. Waxay sidoo kale macnaynaysaa isbadalo cusub ee qaabka aad u safarto, sida tiketyada u gadato, iyo inta qarash aad ku bixiso safarkaaga.

## Faaidooyinka Kaarkayga socdaalka iyo Mina sidor (Boggagayga)

Soo gado Kaarka Socdaalka (Travel card) kuna shub Period Ticket ama Travel Funds (Reskassan). Ama labadaba Travel Funds (Reskassan) waa siyaabo cusub oo sahlan oo lacag loogu shubo kaarkaaga adikoo u maraya Mina sidor (Boggagayga). Waxaad ku shubi kartaa lacago ilaa 100 kronor (SEK 100, 200, 300 iwm.) kadibna kabixi lacagta tiketkaaga markii aad fuusho gaarika.

Travel Funds, waxaad ugu safri kartaa markaad doonto iyo meeshaad doonto ee daafaha wadanka. Waxaad Travel Card ka gadan kartaa dukaankeena kuyaal Eskilstuna Central Station, ama mid kamid ah wakiiladeena (cinwaanka wakiilada waxaad ka heli kartaa websitekeena).

## Iska diiwangali Mina sidor (Boggagayga)

Iska diiwaangali adiga iyo karkaaga Mina sidor (Boggagayga) si aad u hesho waxtaro dheeri ah. Waa bilaa lacag, waana dagdag. Gal [sormlandstrafiken.se](http://sormlandstrafiken.se) si toos ahna u bilow!



Zoonada ayaa tusaya intaad kusafriso karto tiketkaaga, iyo qarashka safarka.



### 1. Lacag uga shubo onlineka Karkaaga Socdaalka

Markii aad iska diiwaangaliso Mina sidor (Boggagayga), tilaabada xigta waa inaad kuxariirisid Kaarkaaga Socdaalka akoonkaaga. Markii karaka laga diiwangaliyo Mina sidor (Boggagayga), waxaad isla markii ka buuxsan kartaa onlineka, markasta oo aad doonayso, adikoo isticmaalaya aalad kasta ama Travel Funds. Sidoo kale waxaad arki kartaa haraaga kujira kaarkaaga iyo dhaqdhaqaaqiisa.



### 2. Damaanadqaadka Lumaha

Kaarka laga diiwaangaliyay Mina sidor (Boggagayga) waxaa si ootomaatik ah u dabara Damaanadqaadkeena Lumaha. Tan macnaheedu waa inaad heli karto haraagaaga xitaa hadii aad lumiso Kaarkaaga Socdaalka. Kaarka adigu xir, nala soo xariirna si aad u qaadato kaar cusub oo ay kujirto alaabahaaga oo dhan. Waxaad kaliya oo u baahantahay inaad bixiso qiimaha kaar cusub, kaas oo ah SEK 20.



### 3. Hal akoon –dhowr Kaarar Socdaal

Gudaha Mina sidor (Boggagayga) waxaad kuxariirin kartaa dhowr Kaarar Socdaal akoonkaaga. Waxaad sido kale kaararka u yeeli kartaa magacyo kala duwan si aad u kala soocdo. Ka diiwaangalinta kaararka Mina sidor (Boggagayga) waa wado sahlan oo loogu maamulo dhowr kaar hal meel.



### Ma doonaysaa inaad iibsato tiket hal jiha kaliya ah?

Markii aad isticmaalayso Mobile Ticket, uma baahnid kaarka socdaalka umana baahnid inaad iska diiwaangaliso Mina sidor (Boggagayga) App-ka kusoo downloadgaree taleefankaaga casrikaa si toosna ugu gado tiketyo taleefankaaga.

## Nala soo xariir

E-mail: [kundservice@sormlandstrafiken.se](mailto:kundservice@sormlandstrafiken.se)  
Taleefanka: 0771-22 40 00  
Nasoo booqo: Station360, Centralplan, Eskilstuna  
Macluumaad dheeri ah waxaad sidoo kale ka heli kartaa [sormlandstrafiken.se](http://sormlandstrafiken.se)